**Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha**

**Qaybta Naafada Korriinka**

# Isticmaalka Therap ee

## Ka-qaybgalayaasha iyo Ilaaliyeyaasha

Therap waa nidaam maareynta kiisaska oo ku salaysan mareegta, kaas oo ay u adeegsadaan Waaxda Naafonimada Horumarinta ee Nebraska (DD) iyo bixiyeyaasha Adeegyada Medicaid ee Guriga iyo Bulshada ku saleysan (HCBS) si loogu sameeyo dukumentiyeyn.

Laga bilaabo Luulyo 16, 2018, ka-qaybgalayaasha, ilaaliyeyaasha sharciga ah iyo kuwa kale ee uu codsado ka-qaybgalaha/ilaaliyaha, waxay awood u yeelan doonaan inay codsadaan magaca-adeegsade iyo erayga sirta ah si ay u galaan Therap. Ka-qaybgalayaasha adeegyada HCBS ee kharash ka dhaafista waxay awoodi doonaan inay arkaan xogta ku saabsan iyaga oo ka timid dhammaan bixiyeyaashooda adeegga.

Isticmaalka koorsada baa waxay noqon doontaa akhris-kaliya (waxba laguma dari karo ama lagama beddeli karo) waxaana keliya muuqan doona qaybaha hoos ku taxan. Fadlan ogow in dhammaan bixiyeyaashu aysan wada isticmaalin dhammaan qaybaha. Kaliya qaybaha hoosta laga xarriiqay ayaa qasab ku ah in lagu diiwaangeliyo Therap, waxaana loo heli doonaa dhammaan ka-qaybgalayaasha.

| | | |
|---|---|---|
| Tilmaamaha Horudhaca ah* | Foomka Xogta Degdegga ah | <u>Xogta ISP</u> |
| Ballamaha & La socodka Caafimaadka | <u>Foomka Xogta Shaqsiga*</u> | <u>Barnaamijyada ISP (Barnaamijyada Horumarinta)</u> |
| Dhacdooyinka Dabeecadda | Bogga Guriga ee Shaqsiga | Warqadda Shaqada ee Mudnaanta Shaqsiga* |
| Qorshayaasha Dabeecadda iyo Dabagalka | <u>Qorshaha Taageerada Shaqsiga (ISP)*</u> | Wada xiriirka Ammaanka ah (SComm) |
| <u>Miisaaniyadda/Oggolaanshaha Adeegyada*</u> | Ajendaha ISP* | |

Si magac-adeegsiga iyo erayga sirta ah loo bixiyo, foomka codsiga helitaanka Therap iyo oggolaanshaha sii-deynta xogta ee la saxiixay waa in la buuxiyaa lana lagu soo diro iimayl ahaan cinwaanka DHHS.DDTherapAccess@nebraska.gov ama boosta ahaan loogu soo diro:

Waaxda Caafimaadka & Adeegyada
Aadanaha ee Laanteeda Naafonimada
Horumarinta Og: Gelitaanka Therap
P.O. Box 98947
Lincoln, NE 68509-8947

Therap waxay soo saartay hagayaal 'sida loo sameeyo' si ay uga caawiyaan isticmaalka iyo dhex isticmaalka qaybihiisa. Dukumentiyadani waxa laga heli karaa mareegta Therap ee loogu talagalay ka-qaybgalayaasha iyo ilaaliyeyaasha oo ku yaalla: https://help.therapservices.net/app/nebraska-individuals-guardians. Websaydhku sidoo kale wuxuu leeyahay xiriiriyaal ilo kheyraadyo ah sida Su’aalaha Badanaa La Isweydiiyo (FAQs) ama Caawinta Tooska ah ee ku jirta menu-ga Xallinta Dhibaatooyinka, kuwaas oo bixiya taageero dheeraad ah. Caawinta Tooska ah ee onlaynka ah ee Therap waxay u jeedisaa isticmaaleha inuu gudaha u galo. Marka aad gasho Therap, isku xirka Caawinta Tooska ah wuxuu hoos yaalaa shaashada soo galista.

Haddii ay jiraan wax su'aalo ah oo ku saabsan sida loo codsado gelitaanka, fadlan ku soo dir su'aalahaaga DHHS.DDTherapAccess@nebraska.gov ama la xidhiidh Isuduwahaaga Adeegga DD.

Foomka Xogta Shaqsiga waxaa gali kara iskudaba-ridaha adeeggaaga ama bixiyaha adeeggaaga.

Haddii ay jiraan su’aalo ku saabsan xogta aad ku aragto Therap oo ku jirta koorsada leh calaamadda ee * kor ku xusan, fadlan la xidhiidh iskudubaridahaaga Adeegyada DD. Haddii ay jiraan su’aalo ku saabsan xogta ku jirta koorsa kasta oo kale, fadlan la xidhiidh bixiyaha adeeggaaga.